

COVID-19: Caawimaad Ka Helidda Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (DHHS) ee Maine



Inta lagu jiro xaaladan sida degdegga ah isku rogroyeyso ee COVID-19 (cudurka cusub ee coronavirus ee 2019), Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maine (DHHS) waxay baddaleysaa qaababka ay wax ugu qabato bulshada rayidka, balse waxaan ku sii dadaali doonaa xaqijinta inay dadka reer Maine helaan kheyraadka ay u baahan yihiin si ay ugu noolaadaan noolal caafimaad iyo wax soo saar leh.

Waxaa la cusbooneysiisay: Maajo 24, 2021

Cawimaada Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Tabarta Yar (TANF)

Haddii aad la dhibaatooneyso inaad fuliso baahiyaha assaasiga ah ee carruurtaada, waxaad xaq u yeelaan kartaa **Cawimaada Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Tabarta Yar**. Barnaamijkan waxaa lagu bixiyaa dheefo lacageed oo ku meel gaar ah si looga caawiyo waalidiinta inay kabaan baahiyahan.

Cuntada Nafaqada Kabta

Haddii aad la dhibaatooneyso inaad naftaada iyo qoyskaaga cunto u hesho, waxaad xaq u yeelan kartaa dheefta **Cuntada Nafaqada Kabta**. Cuntada Nafaqada Kabta waxay ka caawisaa qoysaska dhakhliga yar inay iibsadaan cuntada ay u baahan yihiin si ay u helaan caafimaad wanaagsan.

Caawimaada Daryeelka Caafimaadka

Haddii adiga ama qof qoyska ka tirsan uusan heysanin daryeel caafimaad ama uu la dhibaatoonayo bixinta kharashyada daryeelka caafimaadka, waxaad xaq u yeelan kartaa **Caawimaada Daryeelka Caafimaadka**. Caawimaada Daryeelka Caafimaadka, oo ay ka mid yihiin MaineCare, CubCare iyo Barnaamijka Baahiyaha Caafimaad, waxay lacago siiyaan bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka.*

Caawimaada Gargaarka Dedegga ah

waxaa dheefo lagu siiyaa qoysaska carruurta leh ee ku sugan xaalado u baahan gargaar degdeg ah oo la qeexay marka uu qoysku ay soo wajahaan saboolnimo ama hooy la'aan. Xaaladahan waxaa ka mid ah dab, masiibooyinka kale ee dabiiciga ah, joojinta adeegga guriga, ama guri ka saarida. Lacag bixinta waxaa kaliya la fasixi karaa hal mar sanadkiiba waxaana toos loo siiyaa bixiyaha.

Lacag Kabista Daryeelka Carruurta

waa barnaamij uu maamulo Xafiiska Adeegyada Ilmaha iyo Qoyska oo ka caawiya qoysaska xaqa u leh inay bixiyaan lacagaha daryeelka carruurta si ay markaas u shaqeeyaan, dugsi u aadaan ama ka qaybgalaan barnaamijka tabbabarka shaqada. Booqo <https://www.maine.gov/dhhs/ocfs/ec/occhs/step.htm> ama wac 1-877-680-5866 si aad u codsato.

Caawimaada Guud

waa barnaamij uu gacanta ku hayo maamulka hoose ee degmada kaas oo u soo iibiya waxyabaaha daruuriga u ah shaqsiyaadka aan awoodin inay soo iibsadaan. Codsiga Caawimaada Guud waxaa laga dirsan karaa xafiis kasta oo ah xafiiska maamulka hoose ee degmada. Booqo www.211maine.org ama wac 211 si laguugu xiro kheyraadka bulshada.

*Haddii aad weyso ceymiska caafimaadka ee lagu bixiyo shaqadaada, oo aad xaq u yeelan weyso MaineCare, waxaad xaq u yeelan kartaa Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska si aad uga iibsato qorshaha ceymiska caafimaadka barta HealthCare.gov. Iyada oo ku xiran dhakhliga qoyskaaga, waxaad xaq u yeelan kartaa caawimaad maaliyadeed oo ay bixiso dowlada federaalka ah si looga dhigo khidmadaha adeegga ceymiska kuwa la awoodi karo. Si aad wax badan u ogaato oo aad u hubiso inaad xaq u leedahay, booqo CoverME.gov.



Xafiiska Madaxbanaanida Qoyska

Xafiiska Madaxbanaanida Qoyska wuxuu ka shaqeeyaa codsiyada wuxuuna go'aamiyaa xaq u yeelashada dhawr barnaamijyada iyo dheefaha DHHS ah ayna sii dheertahay bixinta adeegyada taageerida carruurta.

Xiriirka:

Boostada:

114 Corn Shop Ln,
Farmington, ME 04938

Faakiska: 207-778-8429

Taleefonka: 1-855-797-4357

limaylka:

Farmington.dhhs@maine.gov

Sida Loo Codsado Dheefaha:

Onlayn ahaan kaga codso www.maine.gov/mymaineconnection

Ku dir codsi boostada 114 Corn Shop Lane, Farmington, ME 04938

Ku dir codsi fakiska 207-778-8429

Ku dir codsi iimaylka Farmington.dhhs@maine.gov

Dhig ama ka buuxi codsi xafiiska DHHS ee deegaankaaga. Iyada oo codsiga warqadaha la aqbali doono, dadka u baahan caawin dheeraad ah waa inay wacaan taleefon lambarka kor ku qoran si ay wakiil ula hadlaan.

Ku codso wicitaanka taleefonka adiga oo la hadlaya Takhasuslaha Xaq Yeelashada.

Booqo www.211maine.org ama wac 211 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19 iyo sidoo kale taageeroyinka sida cuntada nafaqada kabta ee loogu talagalay Haweenka, Dhalaanka, iyo Carruurta (WIC), Caawimaada Guud, Caawimaada Guryaha, kheyraadka daryeelka carruurta, iyo barnaamijyada dadweynaha.